

LIISKA SAXIDA



Waxyaabah Aad Qaadanaysid

AQOONSI

- Laysan/Aqoonsiga wada marista caruurta Warqadaada dhalashada
- Waraaqaha dhalashada
- -Kaadhka Soosha Sekuuritigaaga ama gargaarka
- Kaadhkaaga welfeerka

MACLUUMAAD KHARASH/DHAQAALA

- Lacag ama kiridhid kaadh
- Buuga Bangiga/Baanka
- Jeeg buugaaga

WARAAQO SHARCI

- Waraaqo kiro ama guri caymiska
- Waraaqaha caafimaadka
- Xusuus qorka caafimaadka caruurta
- Waraaqaha gaadhiga iyo
- Warqada shaqada ama -Kaadhka cagaaran am Fiiso
- Xusuus qorka Iskuulaka
- Baasaboorkaaga
- Waraaqaha furitaanka
- Waraaqaha mas' uuliyada caruurta.

WAXYAAHABAHA KALE EE AAD U BAAHAN TAHAY

- Furaha gaadhiga
- Dawooyinkaaga
- Dahabkaaga iyo
- Buugaaga cinwaanada iyo kaadh taleefoon
- Waxyaabaha yar yar e xidhma
- Sawiradaada, caruurtaada iyo dambilaaha sawiradooda
- Caruusadaha caruurta ku ciyaarto
- Waxyaabaha caruurta lagu nadiifiyo

Hay'ada U Adeega Bini Aadmiga Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda kuma takoorto kamana cunsuriyadaso shaqadaama taageerada sababahala xidhiidha curyaannimo , rag iyo dumar, midab, sinjiyad,diin, da', meesha uu qofku u dhashay awgeed,ama lab iyo dhedig ka qofku yahay.



Jerry E. Abraha
Duqa magaalada

Gudida Louisville iyo Agagaarkeeda

LAMBARADA IYO ADEEHYADA MUHIIMKA AH BOOLIISKA 911

- Goobta Cadaadiska Xaaska 581-7222
- Goobta Musiibada Iyo Macluumaadka 589-4313
- 589-4259, TDD
- Khadka Ilaalinta Dadka Waawayn 595-4803 ama 1-800-752-6200
- Goobta Musiibada Kufsiga 581-7273
- Khadka Adeega Illalinta Caruurta 1-800-752-6200
- Qareenada Degmada ,Qaybta Fara Xumaynta Iyo Cadaadiska Guriga 574-6336
- Xafiiska Sheerifka 574-5471 ama 574-5400
- Booliiska Louisville Iyo Agagaarkeeda, Qaybta Cadaadiska Guriga 574-7043
- Sarkaalka Damaanada Maxbuuska 595-4035
- Xafiiska Qareenada Barwaaqasooranka, Qaybta Cadaadiska Guriga 595-2300 ama 595-2340



QORSHAHAAGA AMAANKA

Xaq Baad U Leedahay Inaad Ammaan Hesho!

Maxaad Samayn Kartaa Si Aad Ammaankaaga U Ilaalisid?



AMMAANKA INTA MURANKU SOCDO

Hadii aad u malaynaysid muranku aanuu joogsanay6n, ku muran meel qol ah ama meel aad ka bixi kartid. Ka fogow mushqusha, Jikada, qolka hurdada iyo meel kasta oo hub ku jiro.

Is bar sidaad gurigaaga ugaga bixi lahayd si ammaan ah. Go'aanso daaqadaha, jaranjarada, iyo albaabada ugu wnaagsan ee aad ka bixi karto, caruurtaadana bar.

Go'aanso deriskaaga aad waydiisan kartid inay booliiska kuugu yeedhaan hadii qalalaase ka dhaco gurigaga.

Go'aanso hadalo baaq aha oo aad u isku afgaran kartaan caruurtaada, deriskaaga iyo saaxiibadaa marka aad u baahantahay inay booliiska kuugu yeedhaan.

Go'aanso halkii aad tegi lahay hadii ay dhacdo inaad gurigaaga ka tagtid(Xataa hadaad is leedahay waligaa gurigaaga kama tagaysid). Isticmaal ra'yigaaga iyo maskaxdaada. Ogow inaad xaq u leedahay inaad is difaacdo ilaa iyo inta khatartu kaa dhaafayso.

ISU DIYAARIN TEGITAAN

Furo kooto dhigasho (Saving Account) waxa loo yaqaan ama furo kiridhid kaadh kuna furo magacaaga.

Ka furo khaanad boostada, si aad waraaqahaaga iyo jeegagaaga si gaar ah ugu heshid.

U dhiibo lacag, mafaatiix dheeraad ah, dawooyin dheeraad ah iyo waraaqahaaga muhiimka ah qof aad ku kalsoontahay oo aan guriga kula deganayn.

Qoro Liis ah meelaha ammaanka ah ee aad tagi kartid hadii aad si deg-deg ah ugu baahatid: qaraabadaada, saldhiga booliiska, hudheel iyo saaxiibada.

Ku noq-noqo oo is bar qorshahaaga ammaanka sida ugu badan.

MARKA WAX ISKU DARSIGU DHAMAADO

Bedel handaraabka albaabka, kuna rakibo sekuuti system, gambaleelka qiiqa uriya, laydhadh debada ah, hubina inaad daaqada xidhay. Hadii aad tahay qof waxyeelo loo gaystay, waxa laga yaabaa in lacag lagu siiyo.

U sheeg deriskaaga iyo qofka guriga kaa ijaaray inaan qofkii kula deganaan jiray dib meesha ugu noolayn ayna booliiska u sheegaan hadii ay xafada ku arkaan.

Caruurtaada u sheeg qorshe ammaan oo ay ku dhaqaaqaan marka aanada la joogin.

U sheeg arintan dadka sharciga u haysta inay caruurtaada xanaaneeyaan, siina koobiyo ah waraaqihii maxkamadu ku siisay, inaan dambiiluhu u soo dhawaan Karin caruutaada.

ISTICMAALIDA AMARKA ILAALINTA DEG-DEGA AH

Mar walba hayso waraaqda ilaalinta. Koobi sii qof aad aaminsantahay. Booliiska wac hadii ninkaagu/naagtaadu jabiyo/jabiso amarka ilaalinta deg-dega ah.

Ka fakir siyaabo kale oo aad u badbaadi kartid hadii booliisku markiiba kuu iman waayo.

MARKAAD SHAQAYNAYSO IYO MARKAAD DADKA DHEX JOOGTO

Go'aanso cidaad u sheegi lahayd markaad shaqada joogtid. Waxaana ku jira xafiiska ama dadka amaanka shaqada ilaaliya. Sii sawirka qofka ku dhibaya, hadii ay suurta gal tahay.

Ololayso in taleefoonada kuu soo dhacaya lagaa baadho cida soo dirtay, lambarka laga soo diray oo mashiin ama cajalad baadho ama qof aad aaminsantahay kaa baadho.

U sheeg saaxiibadaa, reerkiina, dariskaaga iyo dhakhtarkaaga inaad ilaalo deg-deg ah haysatid. Qof ha kuu kaxeeyo ama ha ku gaadhsiiyo gaadhigaaga, baska ama tagsiga hana ku sugo inta aad ka dhaqaaqaysid. Isticmaal dariiqyo kala duwan markaad gurigaaga tagaysid. Ka fakir waxaad samayn lahayd haday dhibaato kula kulanto adiga oo gurigaaga ku sii socda.

Hadii ay suurta gal tahay, samayso qof kugula kulma ama kugu suga gurigaaga hortiiisa.

HIYI KACA CAAFIMAADKAAGA

Hadii aad go'aansato inaad la xidhiidho qofkii ay dhibaataadu idin kala gaadhay, ogow sida ugu ammaanka badan ee aad xidhiidhkaa u samayn kartid.

Go'aanso cida aad si hagaagsan ugala hadli kartid arintaada, kuna siin kara naseexo iyo talooyin. Go'aanso inaad tagtid oo aad ka qayb qaadatid guruubka taageera dumarka ama dadka waxyeeladu gaadhay mudo laba usbuuc ah, si aad taageero uga heshud dadka kale ee kula midka ah una baratid waxyaabo badan oo naftaada ku saabsan.